

Isticmaalida Bogga Intarneetka ee Ka Qaybgalaha (Hage Dhakhso ah) (Participant Portal)

MUHIIM AH! Hagahan waxa uu u maleenayaa in aad gashay Gelitaanka Amni-sugan ee Washington (Secure Access Washington, SAW) oo aadna furtay Bogga Intarneetka ee Ka Qaybgalaha.

Haddii aadan sameysan akoonka Gelitaanka Amni-sugan ee Washington (SAW) oo aadna ku darsatay Bogga Intarneetka ee Ka Qeybqaataha Xafiiska Dacwad Dhegeysiga Maamul (Office of Administrative Hearings, OAH) markaas fadlan raac mid ka mid ah hagayaashaan:

Sameysashada akoon SAW iyo ku darista Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha:

- [Hage Dhakhso ah](#)
- [Hagaha oo Dhameystiran](#) (keliya ah Af-Ingiriis)

Wixii caawinaad ah, fadlan wac **+1-800-583-8271** inta u dhaxeysa 7 subaxnimo iyo 5 galabnimo Isniin ilaa Jimce, marka laga reebo maalmaha fasaxa.

FIIRO GAAR AH: Ugama qeybgaleysid dacwad dhegeysigaaga gudaha Bogga Intarneetka ee Ka qaybqaataha.

Inta badan dacwad dhageysiyada waxaa lagu qabtaa taleefoonka. Eeg Ogeysiiskaaga Dacwad Dhageysiga - waa inaad midkood xaqiijisaa lambarkaaga taleefanka (oo loo yaqaan "check-in") oo garsooraha ayaana ku soo wici doona *ama* waxaa lagaa rabaa inaad soo wacdo wicitaanka shirka dacwad dhageysigaaga.

Ku saabsan Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha

Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha waxa uu ku tusinayaa dhamaan aqoonsiyada ku xidhiidhsan Aqoonsiga Ka qeybqaatahaaga (Participant ID, PID).

Waxaad ka eegi kartaa faahfaahinta aqoonsi kasta, eegi kartaa dukumeentiyada ku jira aqoonsigaas – oo waadna soo dejisan kartaa ama soo gelin kartaa kuwa cusub.

Bogga Intarneetku wuxuu ku tusi doonaa taariikhda iyo wakhtiga dacwad dhegaysi kasta oo soo socda. Ka eeg Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo xaadiro; tani waxay is-bedeli kartaa dacwad dhegaysi kasta ama dacwad dhegaysiyada rafcaannada hay'adaha kala duwan.

Hage Dhakhso ah

- **Home (Bogga soo dhaweynta) (Home)** – guji badhanka Bogga soo dhaweynta wakhti kasta si aad ugu soo noqoto bogga soo dhaweynta ee Boggaaga.

- **Add Case (Ku dar Kiis) (Add Case)** – guji badhankan si aad ugu soo darto dokumentiyada Boggaaga. Ogsoonaw, haddii dokumentiga hore laguugu xidhiidhiyay waxaad heli doontaa fariin sheegeysa iney khalad tahay.
 - **Participant Details (Faahfaahinta Ka qeybqaataha) (Participant Details)** – kuwani waa macluumaadkaaga xiriirka. Waxaad ku dari kartaa ama tirtiri kartaa lambarada telefoonka iyo iimaylada. Si aad u bedesho ciwaankaada boostada, fadlan wac **+1-800-583-8271**.
 - **Your Cases (Kiisaskaadu) (Your Case)** – waa liiska dhammaan dokumentiyada ku xidhan PID-gaaga. Ka guji View Details (Eeg Faahfaahinta) saf kasta si aad u aragto faahfaahinta iyo dukumentiyada, oo ay ku jiraan faylalka maqalka ah ee ka socda dacwad dhegeysigaaga.
 - **Shaashada View Details (View Details) (Eeg Faahfaahinta)** – shaashaddani waxa ay bixisaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan dukumeentigaas. Waxa ka mid ah qaybta Dukumentiyada Elektarooniga ah halkaas oo aad ka soo dejisan karto (oo aadna ka eegi karto) faylasha oo aadna sidoo kale ku soo rari karto faylal cusub si uu garsooruhu u tixgeliyo.
- FIIRO GAAR AH:** Haddii ay jiraan dhinacyo kale oo ku jira dacwad dhageysigaaga, oo aadna dukumentiyada ku soo shubto Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha, waxaad weli u baahan tahay inaad dukumentiyadaas u gudbiso dhinacyada kale.
- **Remove Account (Saar Akoonka) (Remove Account)** – In kasta oo sharraxaadda tallaabadani ay muujinayso inaad xidhayso akoonkaaga Bogga Intarneetka ee Ka qaybqaataha, waxa kaliya ee ay samayso waa ka saarida dhammaan dukumeentiyada akoonkaaga Bogga Intarneetka ee Ka qaybqaataha. Si aad meesha uga saarto Bogga Intarneetka ee Ka qaybqaataha waa inaad taas ka samaysaa liiska adeegyada ee SAW.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimo dheeraad ah:



Ka wac OAH lambarka **+1-800-583-8271** ama,



Booqo www.oah.wa.gov.